Golaha Wakiilada JSL

Waaxda Hadal Qoraalka

Opened: - 10:29 AM **Hansard No.22/5** **Kal-fadhiga 22aad**

Fadhigii 13aad ***08/09/2013***

Warbixinta Wasiirka Wasaarada Cadaalada ee Xeerka Xabsiyada

Baashe Maxamed Faarax Gudoomiyaha:- sideynu u balansanayn waxaa manta fadhiga inala jooga Wasiirka Madaxtooyada Md. Xirsi X. Cali si warbixin inooga siiyo Xeerka Xabsiyada, waxaan ku soo dhowenayaa Wasiirka.

Md. Xuseen Axmed Caydiid. Wasiirka Cadaaladda:- Marka hore Gudoomiye iyo Mudanayaal waan idinsalamaay, waxaa idiin soo gudbiney Xeerkii Xabiyada oo idin horyaal, Sida Qodobka 124aad F/2aad ee Dastuurku wuxuu sheegayaa "Ciidanka Asluubtu waxa uu u xilsaaran yahay haynta iyo toosinta akhlaaqda maxaabiista, Qaab-dhismeedka iyo waajibaadkoodana Xeer ayaa Nidaaminaya", Markaa Xeerkan Xabsiyada ee Golaha horyaal wuxuu xidid ku yeelanayaa oo uu ka dheegmaya Qodobkaa Dastuurka Qeybtiisa ah" Ciidanka Asluubtu waxa uu u xilsaaran yahay haynta iyo toosinta akhlaaqda maxaabiista", wuxuu jideynayaa sidii (how) loo hayn lahaa loona toosin lahaa akhlaaqda Maxaabiista.

Diyaarinta qabyo qoraalka Xeerka Xabsiyadu wuxuu soo maray marxaladahan:-

- Marxalada ay Wasaaradu diyaarinaysay Qabyo-qoraalka Xeer, iyadoo adeegsanaysa aqoonta iyo waayo-aragnimada muwaadiniinta Somaliland sida Gaashaanle Sare Cali Cumar wasiirka la taliye uga ahaa ilaa haddana uga ah arrimaha xabsiyada iyo Ex. Gaashaanle Sare Xasan Cabdi Kheyre oo ahaa khabiir xagga maamumlka Xabsiyada, ka dibna ay ku soo biireen 2 khabiir oo qurbo joogga Somaliland ahaa oo hay'adda IOM Muddo kooban la-lataliyeyaal ahaan ay Wasaaradda ugu qoratey xagga Diyaarinta Qabyo-qoraalka Xeerarka iyo Hanaanka Cadaalad-Ciqaabeedka.

  Marxaladan waxaa laga duulayey Xeerkii hore ee Xabsiyada ee Dawladii hore ee Somaliya iyadoo laga soo qaadanayey wixii inaga anfaca ee Waafaqsan *Xubinta 3aad* ee Dastuurka siiba *Qodobka 27aad Farqadaha*

4aad iyo 8aad iyo Qodobka 28aad Farqadihiisa 2aad iyo 3aad qawaaniinta Caalamiga ah iyo halbeegyada guud ahaanba la aqoonsaday.

- Isla muddada ku xusan qabyo-qoraalka Xeer oo, iyadoo ay wasaaradu waxba kala socon lagu diyaariyay abaabulka iyo kaalmada Hay'adda UNODC, ahaan Xeer isku si loogu diyaariyay wixii la isku odhan jirey Somaliya oo kampala, Djabuti iyo Copenhagen laga soo shaqeeyay.

- Marxalad saddexaad, haddana Wasaaradu dib dadaal ugu gashay in iyadoo qaadanaysa waxa ka anfaca Xeerka lagu diyaariyay abaabulka iyo kaalmada UNODC, isla markaana ujeeddadeedu ahayd sidii ay u diryaarin lahayd Xeeru gaar ah Somaliland oo qaabayntiisa, Tirsiga qodobbadiisa iyo kelmada uu ku qoran yahayba ka duwan yihiin ka loo diyaariyey somaaliya oo ay hore u sii marineysay Qabyo-qoraalkii Xeer ee ay gacanta ku haysey.

- Marxalad ay Wasaaradda u suuro-gashay in ay kharash uga hesho hay'adda UNDP/CSP, adeegsiga khibradda khabiir Somaliland ah oo Wasaaradda la gabogabeeya dadaalladii ay wadday iyo kharashka lagu qabto shir balaadhan oo la isugu keeno aqoontii sharciga iyo waayo-aragnimadii maamulka Maxaabiista ee Muwaadiniinta Somaliland la iskulana meel dhigo nuqulka loo gudbin laha Golaha Wasiiradda.

- Marxaladdii u dambeysay oo ahayd tii uu Golaha Wasiiraddu ku darsey kanaga doodey Qabyo-qoraalka xeerka, aakhirkiina ka dib markii la geliyay talooyinkii Golaha uu 28/02/2013 isla soo qaatey qabyo-qoraalkan la idiin soo Gudbiyo Golaha Wakiilada ahaan.

Intaa hadaan ku dhaafo marxaladaha uu soo maray Xeerkani, waxaan gudbayaa Mabaa'diida uu xeerkani xambaarsan yahay, waxaa ka mid ah:-

1. In xabsiyadu noqdaan goob toosineed, aqoon iyo xirfad-barasho oo wax soo-saar qaranka wax u tara laga xaqiiyo, midhaha wax soo-saarkana looga faa'ideeyo Maxaabiista, horumarinta Xabsiyada iyo markay suurtagal noqoto dhigaal u-sameynta maxaabiista, iyadoo sida lagu duurto-galinayo waxa ka dhiman inta xeerkan lagu sheegay lagu faahfaahin doono Xeer-nidaamiyah.

2. In xuquuqda uu maxbuusku u leeyahay qof ahaan iyo xuquuqa uu u leeyahay ka qof xoriyada laga qaaday ahaamba la dhowro *Qodobka 28aad F/2aad iyo 3aad iyo Qodobka 27aad F/4aad iyo 8aad* ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

3. In nidaamkii xabsi-dhimista (remission) ee hore loogu dhaqmi jirey lagu kaabo nidaamka sii-deyn shuruudeysan (parole system), si ku soo noqnoqshada xabsiyada ee maxaabiista loo yareeyo, marxaladahana culeyska looga dhimo.

4. Si kor loogu qaado daah-furaanta maamulka maxaabiista, lana sugo ku dhaqanka Xeerarka iyo hal-beegyada guud ahaan la aqoonsadey in ay xabsiyadu u furaadaan kor-meerayaasha caalamiga ah, kuwa wadaniga ah iyo Komishanka xuquuqda aadamaha ee Qaramada Midoobey iyo ka Wadaniga iyo waliba ururada xuquuqda aadamaha ee Caalamiga ah.

5. In adeegyada kaalmada sharciga la gaadhsiiyo maxaabiista oo mas'uuliyiinta Xabsiyada ay xidhiidhiyaan maxaabiista iyo maxkamadaha, iyo waliba maxaabiista iyo qareenada ama maxaabiista iyo bixiyeyaasha adeegyada kaalmada sharciga marka Xeerku ay xaqaa siiyaan maxaabiista, *"Xaaladaha ay xeerarku khasab ka dhigaan in qofku yeesho qareen, haduu uu maxbuusku qabsan kariwaayo ama uu qabsan waayo qareen, Sarkaalka tirada iyo soo-dhoweynta ee xabsiga waxa ku waajib ah in uu la xidhiidhiyo hay'adda bixiya adeegyada kaalmada sharciga oo ka mid yahay U-doodaha dadweynuhu (public defender) kuna wargaliyo maxkamadda ay dacwaddiisu taalo".*

6. In maxbuuska dhameysta ciqaabta lagu xukumay aanu u sii xidhnaan Karin bixinta xuquuq madani ah ee ay tahay in xuquuqdaa madaniga ah bixinteeda loo maro habka Xeerka Madaniga ah *Qodobkiisa 30aad Faraqada 5aad.*

Hadaan wax yar ka taabto qodobada iyo arrimaha Xeerka lagu qorey oo dal loo arkay markaa haddana aan is-leeyahay in meelaha hoos ku qoran sixitaan lagu sameeyo ayuu u baahanyahay.

Qoboka 27aad F/3aad oo u qoran sidan "maxbuuskasta oo xukamne ah waxaa xukun jideeyihiisa wehelinaya Sawirka Maxbuuska oo kur ah oo loo soo raaciyo sida Xeer-nidaamiyaha lagu faah-faahinayo" arrintaa sawrika oo ka mida ahaa talooyinkii shirkii ballaadhnaa ee lagaga doodayey Xeerka ka

fiirsasho ayay u baahantahay runtiina qodobkaa Golaha Wasiiradu may dhaadin aniguna maan xasuusin sidan oo kale.

Qodobka 39aad F/3aad in xagga dambe laga raaciyo intan "haddii ay nidaamka ku so dabbaali kariwaayaan kooxaha ka-hortagga kacdoonnada ee xabsiyadu", in intan la raaciyo Xeerkan waxa noo suurto-galisey qalabka lagaga hortago kacdoonnada Maxaabiista oo aan markaa la hayn laakiin hadda u imanaya Xabsiyada oo intii u horreysay in dalka la keeno aan saaka qoraalkoodii saxiixay una direy shirkadda la siiyeye in ay dalka keento qalabkaas oo fadhigeedu yahay kampala ee dalka yugandha.

Qodobka 39aad F/5aad in ereyada *"ka hor inta aan la isticmaalin hubka si waafaqsan qodobkan"* xagga dambe laga raaciyo *"waxaa la adeegsnayaa kooxa ka-hortagga kacdoonada Maxaabiista ee xabsiyada, haddiise xaalada loo arko in aanay sugeyn inta ay ka soo gaadhayaan kooxaha ka-hortagga kacdoonnada Maxaabiistu ama ay xaaladda wax ka qaban kari-waayaan kooxahaasi"*

Qodobka 50aad F/2aad ereyga "Xabsiyadu" oo ay u dambeyso "u" tahay oo noqotey "y" oo qoraalka uun la saxo.

Qodobka 50aad F/3aad in halka *"saddexdii sanoba"* laga dhigo *"lixdii biloodba"* qodobkaasi wuxuu ka hadlayaa Gudiyada Kormeerka Xabsiyada markaa Gudiddaa waxa Xeerku Waajibinayaa in Xeer-nidaamiyaha Lagu qor muddo xilleedkeeda inay noqoto sanad ama laba sano, dabadeedna Kormeerada marka ay qaadeyso waxaa xeerka ku qoran saddexdii sanadoodba mar, markaa Mudada Xilka Gudidda iyo halkaasi isqaban maayaan, waa in laga dhigaa lixdii biloodba mar, mar hadii la waajibiyay inay kormeerto xabsiyada.

Qodobka 62aad lagu daro farqadan cusub oo u dhigan sidan "*xaaladaha at xeerarku ka dhigaan in qofku yeesho qareen, haddii uu maxbuusku qabsan kari-waayo ama uu qabsan waayo qareen, madaxa Xafiiska Tiradda iyo soo dhoweynta ee xabsiga waxa ku waajib ah in uu la xidhiidhiyo bixiyayaasha adeegayada kaalmada sharciga oo ka mid yahay U-doodaha dadweynaha (public defender), kuna wargeliyo maxkamada ay dacwadiisu taallo"* in kastoo xaqaa wax lagaga xusay *Qodobka 20aad Farqadiisa 5aad (b)*, farqadani waxay faah-faahinaysaa qaabka loo fulinayo xaqaa Maxbuuska, markaa waxaan soo jeedinaynaa in lagu daro Xeerka Qodobkiisaa 62aad.

Qodobka 85aad F/1aad oo u qoran sidan “Maxbuuska Dilka lagu xukumey waxa lagu xidhayaa qol gaar ah iyadoo laga soocayo Maxaabiista kale waxaana si joogto ah loogu haynayaa ilaalin gaar ah” waxaa jirtey in maxaabiis dil ku xukuman oo gooni xidhnayd oo u muuqatay in uu ku dhacay xanuunka dhimirku, markii laga soo daayey gooni u-xidhidii oo maalmihii hore hab-dhaqankiisa xakamayn lagu sameeyey si tartiib ah loo soo dhimay ay markii dambe caadi noqdeen. Markaa sidaa darted, gooni u-xidhidda waxa ka haboon oo hadda ii muuqata in maxaabiista dembiyada culus u xidhan la isla xidho, iyadoo mar walba taliyaha xabsiga u banana in uu maxbuus gaar u xidho muddo kooban, haddii laga maarmi waayo, sidaa darted arrintaas oo ku xusan farqadan Qodobka 85aad.

Qodobka 86aad F/1aad oo isna ku saabsan reebbanaanta in cidi u dhawaato maxbuuska dilka ku xukuman waxaan soo jeedinayaa in meesha laga saaro oo la tir-tiro, markaa ina has ayaan ka daba keenay oo aan isleenahay waxay wanaajinayaan Xeerka, hadii Taliyaha iyo taliya kuxigeenadu wax ku darayaa. Waad mahadsantihiin.

Su’aalaha Mudanayaasha.

Md.C/raxman Maxamed Jaamac:-

1. Mudane Wasiir waxaanu matalnaa Gobolo iyo Degmooyinka nalaga soo doorto, anigu waxaa la iga soo doortey Degmada Cadaadley, maxkamada malaha, Maxkamada baan islahayn ka dhisa oo way naga qabyowday, garsooraa idiin jooga meel uu ku shaqeeyona malaha, Markaa wax ka maqaban kartaa arrintaa?

2. Xabsiyadeen waxaa ku xidhan dad badan oo dil sugayaal ah, mudo dheerna xidhan dilkiina laguma fuliyo, waxay ahayd in dillkii lagu fuliyuo ama la sii daayo, arrintaa maxaa idiinka qorsheysasan xuquuqal insaanka meelbay kaga dhaceysaaye?

Jawaabta Wasiirka:-

1. Degmada cadaadley iyo degmayin farabadanba adeega cadaalada way u baahanyihiin in la gaadhsiiyo, laakiin marka dhismaha noqoto runtii ma hawlyara miisaaniyadeenana way ka war haysaa, hay’adihiina inay infrustructureka wax ka qabtaan aad bay ugu dhibanahay, Wasaarada Cadaalada 20kii sanadood central levelkii bay taagantahay mana laha iyada lafteedu Goboladii ay ka shaqeynaysay dhimsmayaal ay ku

leedahay, Markaa taasi waa arrin dhaqaaleheena la socota anigoo oo qaba in dhamaan Degmooyinka la gaadhsiiyo adeegii, hada waxay noqon doonta hadba sida dhaqaaluhu inoogu saamaxo.

2. Arrinta Maxaabiista dilka ku xukuman, waa run oo maxaabiis badan baa isgaadhay qaarkood waa anigii iminka ka hadlaya, iminka Gudoomiyaha Maxkamada sare iyo waanu u balansanayn oo fulinta madaxweynaha waan ka wada hadalney, waxaa dib u dhigtey Madaxweynaha oo uu baxay Boorame maalintii Jaamacada Camuud, waana u balansahay, waxay u muuqanysaa arrin adag hadii la yidhaahdo mar dil ha lagu wada fuliyo, oo internationalka iyo media oo dhan baynu soo jiidanaynn, bal sidii kale ee xal lagu helli lahaa ayaan u baahanahay oo xukuumadu doorweyn ka qaadato, markaa kuwii hore sideynu meesha uga saari lahayn aynu falawgeed qabano, hadii lagu qanciyo qofkii in diyo laga qaato way u furantahay, Markaa runtii waa arrin aanu isleenahay dhowaan ka hawlgala.

Md. Cali X. Maxamed Muuse:-

1. Disciplineka askarta ayay ka mid tahay qaabka direyska loo qaato, waxaan jecelahay in askarta loo sheego disciplineka iyo qaabkey u labisanayaan?

2. Madaama askarteenii ayna haysan direys ku filan, wasaarada ahaan inaad qandaraas ku qaadataan oo si isku mid ah loo habeeyo dhamaan dariyeysyada, qolo walba nooceeda?

Jawaabta Wasiirka:-

1. Arrintaa direyska iyo booliiska dee taliyayaashii baa ila fadhiya way maqlaya oo ka masuul, iyagaana xagaa wax ka odhan doon, xaga direyska Xabsiyada iyo Ciidankaba ayaan ka hadlayaa, xabsiyada doora waxaa inooga hirgalaygalay tolidii dharka ee dawaarka, Xabsiga burco, Xabsiga Hargeysa iyo Mandheera waxaa ka hirgalay tolida dharka ee dawaarka, waxaa wax lagu faano inoo ah in 18 may ee sanadkan ciidankii booliiska asluubta ee Gaardiska soo maray waxay ku mareen direys ay tosheen, iminka direykii harqadeedii way u taal, maxaabiista kuwii loogu tolilahaa oo kala jaad-jaad ah kan xabsiga Culus waxa loo xidhayo, kan xabsiga dhexe waxa loo xidhayo iyo kan dambiga fudud kan loo xidhayo oo lagu kala garan lahaa dambiyada oo mid dambi culus uu meel dambi fudud ilaaladu ku aragto ay u garan lahay.

Jawaab Taliyaha Ciidanka Bileyska:-

2. Marka hore mudanayaal waan idin salaamayaa, waxaan ka jawaabayaa su'aashii xildhibaanka ee direyska, mar hadii derajadii la bixiyay waa waajib in la fuliyo oo lagu ilaaliyo direyskii, waanu bilawnay iminka inaan meel qaad lagu cunayo aan la fadhiisan Karin, waxaanu ku dedaalayaa inaan soo saarno askari anshax fiican,dharkana sanadkii mar baa la bixiyaa oo duruufaa iska jira, tan kale waajibaadka ciidanka Asluubta waa maalulka iyo ilaalinta Maxaabiista iyo la shaqeynta Golaha Garsoorka iyo Maxkamadaha, intaas weeye waajibkayagu, sharcigii wuu ina horyaalaa, waxaa loo baahanyahay in wax ina anfaca aad ka soo saartaan.

   dhowaan waxaanu soo saarney furniturekii suuqan keenay, waxaa jirta in chine laga keenay qaar, mar hadii suuqii xoryahay waxay noqotey oo kaliya inaanu maxaabiista uun barno ee aanan iibin, intii itaalkayag ahna jaajuurkii iyo waxbadan waanu sameynay, iminka xildhibaanku cadaadley buu ka hadlayay Haregysa xabsi malaha ilaa 460 sanadood buu jiraa xabsigani, maxaabiistii meel qaada malaha, waxaanu geynaa berbara iyo Mandhera waxayagiiba waxay ku dhamaadeen gaadhi biri-jabtey iyo shidaal, markaa C/casiisna inaad u sheegtay baanu codsanaynaa, waad mahadsantihiin.

Md. Baar Siciid Faarax:-

1. Mudane Wasiir waxaa dhacda in sanad walba maxaabiis la cafiyo oo madaxweynuhu cafiyo, maxaabiistaa la cafiyaa waa tuug oo dhib ayay dhib ugu keenaan dadka, Maxaabiistaa la soo cafiyo Ma Madaxweynaha recomendationkiisa mise idinkaa iska leh?

2. Waxaan ku jirijirey Gudida Xuquuqal Insaanka iyo shuruucda oo meelo badan soo kormeertey, waxaa jirta Maxaabiis wakhti dhaafa maraan soo marney Gabiley, markaa wali ma sidii bay wakhti dhaaf u yihiin mise waxbaad ka qabateen?

Jawaabta Wasiirka:-

1. Xildhibaan Baar aad bay u mahadsantahy, hadaan cafiska ka hadlo, runtii sanadadii hore way dhici jirtey in la iska cafiyo oo aan la eegin, labadii sano ee u dambeysay waxaan filayaa inaan cafisba la bixin, sida kal hore waxaa la bilaabay in daraasad lagu horeysiiyo dadka la sii

deynayo oo dadka loo arko in haduu mardambe ku soo noqdo xabsi aan la cafiyin, isla markaana xabsiyada loo dheereyo oo recordskooda la la socdo, wax walba sanadka hore ma hagaagan, sanadkan caadeystaha qofka xadhiga ku soo noqnoqda, markaa waxaan isleeyahay labadii sanadood ee u dambeysay waxbaa isbadalay oo sidii hore maaha.

2. Xaga mudo dhaafka, runtii ahaantii bishii u horeysay ee aan Wasaarada la wareegay ee ahayd bishii june ee sanadkii 2011kii, bishii xigtey ee jully warbixintii aan xabsiyada ka helay anoo waajibeyay in Xabsiyada Warbixin bile ah laga keeno oo markaa warbixinta bishaa eegno maxaa xukun suge ah? Maxaa Racfaan suge ah, ee bisha dambena aanu helno oo la iska eegno qodobkii uu ku eedeysanaa maxbuusku iyo mudadii uu xidhnaa, inaanu markaa maxkamadaha aanu u kala alertgareyn karno oo nidhaahno halkaasi ayaa maxaaabiis mudo dhaaf ay idinku sugayaan, warbixintaas oo si joogto ay xabsiyadu u keenaan oo aanu 8 xabsi noo suura gashay inaanu qalabeyno oo computer iyo printers aanu u sameynay si ay meesha uga baxdo qalabkii hore ee hadba dib loo qoreyay, marka ay qalabkaa ku shaqeyaan marba filebay la soo baxayaan oo maxaa bishaa suuragalay ay eegaaan, Markaa xidhiidhkaasi wuxuu noo fududeynayaa inaanu ilaalino maxaabiistii mudo dhaafka ahayd ee xabsiyada iyo inay helaan maxaabiistu qareenadii sharciga u lahaayeen iyo adeegii sharci.

Md. Ibrahim Axmed Reygal:-

1. Waxaan xasuusnahay markii golahan la soo doortey, biilka maalin laha ee maxbuusku wuxuu ahaa 2000 sh/sl, waxaanuna ka dhigney 5000 sh/sl.?

Jawaab Wasiirka:-

1. Waxaan kuu sheegayaa maxbuuskeenu 8000 ayuu qaataan iminka halkad 5ta ku ogeyd, walina waxaan qabaa dee itaalkeenaa intaa ahe in loo kordhiyo way istaahilaan oo noloshoodii lagu ilaaliyo, iyana way badanyihiin oo kordhintoodu culeys bay keenaysaa, waxyaabo noloshooda laga daboolo inay sameystaan oo wax soo saar iyo beero yar oo wax kala soo baxaan in loo sameeyona way istaahilaan.

Md. Saleeban Yuusuf Cali Koore:-

1. Waxaan Wasiirka waydiinayaa taliskii hore ee Ciidanka Asluubta dalkii la isku odhan jirey somaliya waxay lahaan jireen Investment in la

maalgaliyo xabsiyada oo la amaahiyo fund ama Wasaarada Maaliyadu ha amaahiso ama hay'addo eh, waxaa qofka dambiilaha loo xidhaa inuu soo baxo isagoo dadka u shaqeynkaro, Markaa Wasaarada maaliyada Suurtagal ma tahay in uu Xabsiyada Maalgaliyo si Maxaabiista wax soo saar u sameeyan oo hadba ka goosto inta suurtgal ah marka wax soosaarkooda, dadkii dambiyada ku xukunaa ay noqdaan kuwo marka ay dibada u soo baxaan shaqeysan kara, Markaa Suurtagal matahay inaad Wasiirka Maaliyada iyo Gudoomiyaha Baanka ka wada Hadashaan arrintaa?

Jawaab Wasiirka:-

1. Runtii waa fikrad wanaagsan, laakiin waxay ila tahay waa anigii iminka ka waramay barnaamijkan parol system waxaa loogu talagalay in xarumo dawladeed oo uu wax ku sii barto in arrangegareeyo hadhaw markuu wax bartona tuulyar oo uu ku shaqo tagikaro loo sameeyo, arrimahaa hay'adan la wadnaafilimaayo inay iminka inooga suurtaglimeyso Wasaarada Maaliyada dhaqaaleheedu halkuu marayo, laakiin way noo socodaan oo hay'ado ayan kula jirnaa oo waa barnaamij inoo socda oo Xeerka iyo dhaqangalkiisa ayuu sugayaa Maxaabiista dhamaanteed

Jawaab Taliyaha Asluubta:- inyar baan ku daryaa intaa wasiirka, waxaanu damacney inaanu dhaqaajino ama dhaqaajinay furniturekii odayashii dawladii hore u shaqeyn jirey mar haday gaabka ka baxayaan xoogaa baa noo hadhay, dabadeedna ciidanka iyo baxaabiista aqoontii halaga hadho ilayn maalinba ninbaa baxayee dabadeedna waxaanu sameysanay Roomkii dabadeena suuqa tagno oo 7 kun ka soo amaahano, alaabtii baakhaar baanu u dhiibanay, Markaa Sariirtii u horeysay waa la amaahday, waxay noqotey inaan 7dii kun nagu go'day oo aanu iska bixino, tankale ee jirta waxa weeye Hargesya malaha xabsiyadii Caruurta iyo dumarka, Dumarka waxaanu geynaa Berbera, Caruurtana Mandheeranu geynaa, markaa arrintaana la socda, waadmahadsantihiin.

Cawad Cali Maxamed	**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada	**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
---	---